

## Su'aalaha Badanaa La Iska waydiiyo ee ku saabsan Shardiga qaadashada Tallaalka COVID-19 ee Adeeg bixiyaasha Daryeelka carruurta, Barbaarinta Ubadka, iyo Hormarinta Carruurta

Bishii Agoosto 18, 2021 Gudoomiye Jay Inslee [ayaa ku dhawaaqay](#) in inta badan adeeg bixiyaasha daryeelka carruurta, barbaarinta ubadka, iyo hormarinta carruurta **ay qasab tahay inay qaataan talaalka buuxa ee COVID-19 kahor Oktoobar 18, 2021 ama ay soo qaataan shardi dhaafka diinta ama caafimaadka ku salaysan.**

Gudoomiyaha ayaa sidoo kale ku dhawaaqay in shaqaalaha xarumaha jaamacadaha, macalimiinta dugsiyada K-12, shaqaalaha dugsiga, tababarayaasha ubadka, darawalada basaska, mutadawiciinta dugsiga, iyo dadka kale ee ka shaqaynaaya xarumaha dugsiga ay tahay inay talaalka buuxa qaataan illaa Oktoobar 18, 2021 taasoo shardi u ah shaqada. Kuwaan waxaa ku jira dugsiyada dawlada, kuwa gaarka loo leeyahay, iyo kuwa charter ah.

Fadlan akhri [bogga Su'aalaha inta badan la isweydiiyo ee Masuuliyada Talaalka](#) oo aad ka helayso barta Gudoomiyaha. Xog dheeraad ah ayaad ka heli kartaa Office of Superintendent of Public Instruction (Xafiiska Maamulaha Guud ee Casharada Dugsiyada Dawlada) oo ku jirta [Su'aalaha inta badan la isweydiiyo ee Shaqaalaha Dgsiyada K-12](#).

Department Of Health (DOH, Waaxda Caafimaadka) ayaa cusboonaysiin doonta dukumiintigaan su'aalaha badanaa la iswaydiiyo marka amarka gobalka la badelo iyo marka xog dheeraad ah soo baxdo.

### Su'aalaha inta badan la isweydiiyo

Qofkee laga doonayaa inuu raaco waajibka qaadashada talaalka?

#### **Su'aal: Waa kuwee Adeeg bixiyaasha Daryeelka carruurta, Barbaarinta Ubadka, iyo Hormarinta Carruurta ee amarkan talaalku qabanaayo?**

**Jawaab:** Waqti xadirkaan, shardigaan talaalka COVID-19 ayaa qabanaaya:

- Shaqaalaha xarumaha daryeelka carruurta iyo daryeelka guriga qoyska ee ruqsada leh haystana shahaadada, ayna ku jiraan shaqaale kasta oo boos buuxin ah
- Early Childhood Education and Assistance Program (ECEAP, Barnaamijka Waxbarashada iyo Caawimaada Ilmaha aadka U yaryar), Early ECEAP (Barnaamijka Waxbarashada Dhallaanka iyo Caawimaada Ilmaha aadka U yaryar), Head Start (Barnaamijka Balaaran ee Waxbarashada Dhallaanka), iyo barnaamijyada Xarunta leh ee Early Head Start (Barnaamijka Dhallaanka ee Qoysaska Dakhliga Hoose)
- Barnaamijyada barbaarinta ubadka ee ruqsada laga dhaafay, iyo daryeelka carruurta ee ruqsada laga dhaafay ee lagu baxsho meel ka baxsan guriga cunuga

- Barnaamijyada hormarinta dhallinta ee baxsha daryeelka carruurta iyo taageerooyinka kale ee aasaasiga ah siinaaya carruurta iyo dhallinta da'da dugsiga, ayna ku jiraan taageerooyinka helitaanka casharada K-12
- Qandaraaslayaasha, ayna ku jiraan tababarayaasha barbaarinta ubadka iyo daryeelka carruurta, la taliyaasha, mutadawiciinta, tababarayaasha, iwm.

### **Su'aal: Waa kuwee adeeg bixiyaasha daryeelka carruurta iyo barbaarinta ubadka ee aan laga doonayn inay raacaan amarka talaalka?**

**Jawaab:** Waqti xaadirkaan, shardigaan talaalka COVID-19 ma quseeyo:

- Adeeg bixiyaasha Family, Friend, and Neighbor (FFN, Qoyska, Saaxiibka, iyo Dariska), ayna ku jiraan kuwa qaata lacagta kaabista ah ee daryeelka carruurta
- Xubnaha qoyska ee adeeg bixiyaasha guriga qoyska ee ruqsada leh
- Daryeelka carruurta ee ruqsada laga dhaafay ee lagu bixiyo isla guriga ilmaha (tusaale ilaalinta ilmaha, adeegyada xanaanaynta, au pairs)
- Barnaamijyada qabiilka, ayna ku jiraan kuwa ruqsada leh ama shahaadada ka haysta Department of Children, Youth, and Families (DCYF, Waaxda Carruurta, Dhallaanka, iyo Qoysaska), ama barnaamijyada ruqsada ka haysta federaalka
- Barnaamijyada ruqsada laga dhaafay ee lagu bixiyo xarunta ururada diimaha (tusaale daryeelka carruurta ee xarunta ee uro badan oo diimeed baxshaan ayadoo qayb ka ah adeegyada diinta, sida barbaarinta saqiirada iyo casharada Axada la baxsho)
- Adeeg bixiyaasha nashaadaadka kobcinta ubadka sida ciyaaraha carruurta; kaamamka habaynka lagu dhaxo; Iskoodyada, Dabshidka, iwm.; casharada gaari wadista; casharada jirdhiska carruurta (tusaale, yoga, farshaxanka dagaalka, bandhiga farshaxanka, jimicsiyada la hagaayo, iwm.); nasiinada banaanka dugsiga oo la hagaayo iyo casharada sida loox ku orodka, goalafka, iyo dabaasha; iyo nashaadaadka lamidka ah ee aan caadiyan lagu bixin shaqada daryeelka carruurta.
  - Waqti xaadirkaan, amarka 21-14.1 looguma talagelin inuu sameeyo adeegyada iyo shaqooyinka lagu baxsho beeraha raaxada iyo waaxaa nasiinada maxaliga ah iyo ururada kale ee bulshada ee u adeegga carruurta marka laga reebo in xarumahaas ay bixiyaan daryeelka carruurta, ayna ku jiraan daryeelka ruqsada leh iyo kuwa aan ruqsada lahayn, iyo taageerooyinka aasaasiga ah ee tooska loo siiyo carruurta iyo dhalinta.

### **Su'aal: Adeeg bixiyaasha Daryeelka carruurta, Barbaarinta Ubadka, iyo Hormarinta Carruurta ma diidi karaan shardigaan?**

**Jawaab:** Maya. Shuruudahaan amarka lagusoo saaray fulinta Gudoomiyaha gobalku waxay leeyihiin awood sharci, adeeg bixiyaashuna waa inay raacaan amarka. Shaqaalaha shardiga laga doonaayo waa inay ama qabaan talaalka buuxa ama buuxiyaan shuruudaha shardi dhaafka caafimaadka ama shardi dhaafka diimeed.

### **Su'aal: Carruurta dhigata barnaamijyada daryeelka carruurta, barbaarinta ubadka, iyo hormarinta carruurta ma laga doonayaa inay qaataan talaalka?**

**Jawaab:** Maya. Waqti xaadirkaan, carruurta u qalma inay qataan talaalka lagama doonaayo inay qaataan talaalka. Ayagoo ah mulkiilayaal ganacsi oo madax banaan, loo shaqeeyaasha ayaa samaysan kara xeerarkooda gaarka ah ee la xariira carruurta da'da u qalanta qaadashada talaalka ee ku jira daryeelkooda. State Board of Health (Gudigga Caafimaadka Gobalka) ayaa leh hanaan rasmi ah oo lagu dajiyo shuruudaha talaalka ee carruurta ku dhaqan gobalka Washington.

Inkastoo aysan qasab ahayn, Centers for Disease Control and Prevention (CDC, Xarumaha Kahortaga iyo Xakameynta Cudurada) iyo DOH da gobalka Washington ayaa si wayn ugu talinaaya in dhammaan dadka

jira 12 sano iyo ka wayn ay qaataan talaalka isla marka ay heli karaan si ay u difaacan naftooda iyo bulshooyinkooda.

### Sidee ayaan ugu dhaqmayaa amarka talaalka?

#### Su'aal: Xad intee le'eg ayay tahay inaan boobsiiyo qaadashada talaalka si aan u raaco amarka?

**Jawaab:** Shaqsiyaadka ayaa loo aqoonsanayaa kuwo talaal buuxa qaba 14 maalmood kadib kuuradooda ugu danbaysay ee talaalka Pfizer ama Moderna ama 14 maalmood kadib markay qaataan kuuradooda keliga ah ee talaalka Johnson & Johnson. Adeeg bixiyaasha daryeelka carruurta, barbaarinta ubadka, iyo hormarinta carruurta waa inay qaataan kuurada labaad ee talaalka labada kuuro ah ama halka kuuro ee talaalka halka kuuro ah ugu danbayn Oktoobar 4, 2021.

Adeeg bixiyaasha waxaa lagu boorinayaa inay sugaan si ay u muddaystaan balan si loo xaqiijiyo inay waafaqaan waqtiga loo cayimay, maadaama helitaanka nooca talaalka kamid ah ay kala duwan tahay ayadoo ku xiran goobta iyo cabirada waqtiga ee u dhexeeya cirbadaha talaalku ay kala duwanaaana karana sidoo kale.

#### Waqtiyada Muhiimka ah ee Loo cayimay Talaalka:

Talaalka	Inta Kuuro ee Loo baahan yahay	Kuurada Koobaad Ugu danbayn waa in la qaato	Kuurada labaad	Kuurooyinka la Dhamaystir ay	Talaal buuxa Qaatay = Labo Asbuuc ka jooga Kuuradii ugu danbaysay (Waa qasab in la qaato ugu danbayn 10/18)
<b>Pfizer</b>	2 kuuro, 21 maalmood ayaa u dhaxeysa	09/13/21	10/04/21	10/04/21	10/18/21
<b>Moderna</b>	2 kuuro, 28 maalmood ayaa u dhaxeysa	09/06/21	10/04/21	10/04/21	10/18/21
<b>Janssen/Johnson &amp; Johnson</b>	Hal kuuro	10/04/21	N/A	10/04/21	10/18/21

#### Su'aal: Maxay ka dhigan tahay inaan talaal buuxa qabo?

**Jawaab:** Inaad talaal buuxa qabto waxay ka dhigan tahay in qofku uu ka joogo ugu yaraan labo asbuuc xiligii uu qaatay kuuradii kama danbaysta ahayn ee nooca talaalka COVID-19 ee uu qaatay.

#### Su'aal: Xagee ayaan ka heli karaa talaalka?

**Jawaab:** Goobaha lagu bixinaayo talaalka dhammaan gobalka ayaad ka helaysaa markaad booqato [Vaccine Locator webpage \(webseedka Aalada Talaalka raadisa\) ee](#) Washington State Department of Health.

#### Su'aal: Talaalku ma yahay mid ammaan ah?

**Jawaab:** Haa. Talaallada COVID-19 waxaa lagu tijaabiyay tobanaan kun oo qof oo ka qaybgalay tijaabooyinka caafimaadka waxaana qaatay talaallada COVID-19 malaayiin Ameerikaan ah ayadoo lagu samaynaayo korjoogtaynta badqabka oo ah tii ugu adkayd taariikhda Maraykanka. [Xog dheeraad ah oo ku saabsan badqabka talaallada COVID-19](#) ayaa laga heli karaa tilmaamaha kasoo baxa U.S. Centers for Disease Control and Prevention (CDC). U.S. Food and Drug Administration (FDA, Maamulka Cuntada iyo Daawada Maraykanka) [ayaa ogolaaday](#) in talaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 la siiyo shaqsiyadka da'aha 16 sano jirka ah iyo kuwa kasii wayn.

**Su'aal: Haddii uu mar horaba igu dhacay COVID-19 aana leeyahay difaac dabiici ah, miyaan u baahan nahay talaalka?**

**Jawaab:** Haa. Amarku ma bixinaayo shardi dhaaf ku aadan dadka uu horay ugu dhacay caabuqa COVID-19. Khubaradu wali ma oga mudada difaaca laga helo qaadista caabuqa COVID-19 ay socon karto waxayna ku talinayaan in la qaato talaalka ayadoon laga eegayn inuu horay kuugu dhacay iyo inkale COVID-19. Dadka ayaa ku jiran kara COVID-19 markale kadib markay horay ugasoo bogsodeen. Daraasaadka ayaa muujiyay in talaalku uu kobcin xoogan siinaayo difaaca dadka kasoo bogsoday COVID-19.

**Su'aal: Shardiga talaalka ee Gudoomiyaha ma ku jiraan cirbadaha xoojinta talaalka?**

**Jawaab:** Amarku ma tixgelin shaacinta dhawaan soo baxday ee talaallada xoojinta ah ama kuurooyinka saddexaad waqti xadirkooda.

**Su'aal: Shardiga gudoomiyuhu ma ogolaanayaa shardi dhaafyada, sida sababah caafimaadka ama diinta?**

**Jawaab:** Amarka Gudoomiyuhu wuxuu u ogol yahay adeeg bixiyaasha daryeelka carruurta, barbaarinta ubadka, iyo hormarinta carruurta inay helaan shardi dhaafka diinta ama caafimaadka la xariira. Fadlan arag xogta hoose ee ku aadan [Sidee ayaan u codsanayaa shardi dhaafka sababta caafimaad ama diimeed?](#)

[Sidee iyo meeshee ayaan kusoo dirayaa cadaynta ku dhaqanka amarka talaalka?](#)

**Su'aal: Sidee ayaan ugu gudbinayaa caddaynta buuxinta waajibka qaadashada talaalka qofka aan u shaqeeyo?**

**Jawaab:** Shaqaaluhu waa inay raacaan hanaanku uu dajiyay qofka ay u shaqeeyaan ee ku aadan keenista cadaynta talaalka. Caddaynta la aqbali karo waxaa kamid ah mid kamid ah kuwa soo socda:

- Kaarka diiwaanka CDC ee talaalka COVID-19 ama sawirka kaarka
- Dukumiintiga talaalka ee ka yimid dhakhtarkaaga ama diiwaanka elektarooniga ah ee caafimaadka
- Diiwaanka State Immunization Information System (Nidaamka Xogta Talaalka ee Gobalka)
- Shahaadada Gobalka Washington ee Talaalka COVID-19 oo aad kasoo baxay [MyIRmobile.com](#)

Caddaynta iskaa ah maaha qaab cadayn oo la aqbali karo.

Akhri [Visual Guide to Official Washington State Proof of COVID-19 Vaccination](#) si aad u aragto waxa nooc kasta oo dukumiintiga ah ka dhigan yahay.

**Su'aal: Sidee ayaan u codsanayaa shardi dhaafka sababta caafimaad ama diimeed?**

**Jawaab:** Shaqaaluhu waa inay codsadaan shardi dhaafka caafimaadka ama diinta ayagoo raacaaya hanaanka cida ay u shaqeeyaan ee shardi dhaafka caafimaadka ama diinta. Ilaha ama tusmooyinka foomamka shardi dhaafka caafimaadka iyo diinta ee loo shaqeeyaasha daryeelka carruurta, barbaarinta

ubadka, iyo hormarinta carruurta adeegsan karaa ayaa laga heli karaa bogga [Su'aalaha inta badan la isweydiyo ee ku saabsan Talaalka Qasabka ah](#) ee gudoomiyaha. Shaqaale la siiyay shardi dhaaf ayaa markaas kadib mari doona dib u eegis gaar ah si loo go'aansho in hawl fududayn la samayn karo iyo inuu buuxiyo baahiyaha ganacsi ee loo shaqeeyaha asagoon abuurin culays.

**Su'aal: Ma tahay in adeeg bixiyaasha daryeelka carruurta, barbaarinta ubadka, ama hormarinta carruurta haystaan nuqullada cadaynta talaalka shaqaalaha ama ay buuxshaan shardiga talaalka ee lagu baxsho hawl fududaynta diinta ama caafimaadka qusaysa?**

**Jawaab:** Adeeg bixiyaasha daryeelka carruurta ee leh ruqsada ama shahaadada iyo qandaraaslayaasha ECEAP waa inay haystaan nuqulka cadaynta xaqiijinta talaalka oo ay ku hayaan galka xarunta ee shaqaalaha. Adeeg bixiyaasha daryeelka carruurta, barbaarinta ubadka, iyo hormarinta carruurta ee ruqsada laga dhaafay ayaa u baahan doona inay go'aanshaan haddii ay habboon tahay inay haystaan nuqulka diiwaanka cadaynta talaalka ee shaqaalaha ayagoo ku salaynaaya baahiyaha ganacsigooda. Loo shaqeeyaashu waa inay ka fakaraan khataraha sharci ee la xariira haynta diiwaannada noocaas ah, ayagoo heli kara inay keliya qoraan in shaqaaluhu si macquul ah u caddeeyay inuu qaatay talaalka.

**Su'aal: Shaqaalaha Daryeelka carruurta, Barbaarinta Ubadka, iyo Hormarinta Carruurta ma ku caddayn karaan inay qaateen talaalka inay keliya ku dhaartaan?**

**Jawaab:** Maya. Shaqaaluhu waa inay keenaan cadayn ayagoo keenaaya midkood dukumiintiyada ku jira [Visual Guide to Official Washington State Proof of COVID-19 Vaccination](#).

**Su'aal: Waxaan ruqsad ama shahaado ka haystaa DCYF ama waxaan ahay qandaraasle u shaqeeya ECEAP. Miyaan u baahan nahay inaan u keeno caddaynta buuxinta shardiga talaalka DCYF?**

**JAWAAB:** Shaqaalaha ruqsada haysta ama shahaadada haysta iyo kuwa ECEAP ayaa buuxin doona diiwaanka shaqaalaha ee xaqiijinta fudud, MERIT, oo sheegaaya inay buuxiyeen mid kamid ah dookhyada suuragalka ah ee buuxinta waajibka qaadashada talaalka. Shaqadaan ayaa diyaar ku noqon doonta MERIT dhawaan.

DCYF ayaa isha ku hayn doonta ku dhaqanka adeeg bixiyaha ee waajibka qaadashada talaalka COVID-19 ee xarunta ruqsada leh ee daryeelka carruurta, guriga qoyska, iyo heerka qandaraaslaha ECEAP. Marka laga hadlaayo daryeelka carruurta ee ruqsada leh, ku dhaqanka waajibka talaalka COVID-19, oo ay ku jiraan shardi dhaafyada la aqbalaayo, ayaa dib u eegis lagu sameyn doonaa booqashada xigta ee kormeerka. Xog dheeraad ah oo ku saabsan jadwallada kormeerka ee ECEAP ayaa dhawaan la shaacin doonaa.

**Su'aal: Sidee ayaan u buuxin karaa shardiga talaalka haddii aan u shaqeeyo degmo dugsiyeed ka tirsan barnaamijka ECEAP/Early ECEAP ama Head Start/Early Head Start? Maxay u baahan tahay degmadu inay ogaato, maxayse tahay in DCYF (Department of Children, Youth and Families) ay ogaato?**

**Jawaab:** Degmada Dugsiga ayaa qaadan doonta masuuliyada xaqiijinta dukumiintiyada shaqaalahooda sidoo kale bixinaaya adeegyada ECEAP/Early ECEAP ama Head Start/Early Head Start . Shaqaalaha degmo dugsiyeedka ee ECEAP/Early ECEAP ama Head Start/Early Head Start ayaa sidoo kale u baahan inay ku qoraan nidaamka DCYF ee MERIT caddaynta ah inay buuxsheen shardiga talaalka sida uu xaqiijiyay loo shaqeeyahooda degmo dugsiyeedka.

**SU'AAL: Baaritaanka joogtada ah badal ma u noqon karaa talaalka adeeg bixiyaha ee ku cad amarkan?**

**Jawaab:** Maya. Haddii qof uusan u qalmin shardi dhaaf, waa qasab in la talaallo. Baaritaanku maaha badal la aqbali karo. Haddii qof uu u qalmo shardi dhaaf, waa laga dhaafayaa shardiga qaadashada talaalka. Baaritaanka ayaa noqon kara dookh uu loo shaqeeyuhu ku xakameeyo shaqsiyaadka xaq u leh shardi dhaafka.

### **Su'aal: Ka waran haddii qof diido inuu talaalka qaato?**

**Jawaab:** Dhammaan adeeg bixiyaashu waa inay talaalka buuxa qaataan ugu danbayn Oktoobar 18, 2021, oo ah shardi ku xiran u qalmida sii wadista shaqada illaa inay helaan maahee shardi dhaaf la xariir sababo caafimaad ama diimeed. Loo shaqeeyaashu waa inay raacaan xeerarkooda gaarka ah ama ay raadsadana talo caafimaad oo la xariirta cayrinta shaqaalaha haddii shaqaaluhu uusan u qalmin inuu sii wado shaqada.

Loo shaqeeyaashu waa inay iskudayaan inay sii wadaan shuruudaha dheeraadka ah ee badqabka adeeg bixiyaasha la siiyay shardi dhaafka.

### Macluumaad Dheeraad ah

- [Su'aalaha inta badan la isweydiyo ee la xariira Shardiga Talaalka | Gudoomiye Jay Inslee \(wa.gov\)](https://www.wa.gov)
- [Shardiga Talaalka COVID-19 ee Shaqaalaha Dugsiga: Su'aalaha inta badan la isweydiyo \(www.k12.wa.us\)](http://www.k12.wa.us)
- [Center for Parent Information & Resources](https://www.centerforparentinformation.org)
- [Child Care Law Center](https://www.childcarelawcenter.org)

### Ilo iyo Xog dheeraad ah oo Ku saabsan cudurka COVID-19

Hel xogtii ugu danbaysay ee [Xaalada hadda ee COVID-19 ka jira Washington, Amarada Gudoomiye Inslee](#), [astaamaha xanuunka, sida uu ku faafo](#), iyo [sida iyo goorta dadku ay tahay inay isbaaraan](#). Ka eeg [Su'aalaha inta badan la isweydiyo](#) ee macluumaadka dheeraadka ah.

Qofka isirkiisa/haybtiisa ama wadanka uu u dhashay, Kama dhigayaan mid khatar wayn ugu jira, in uu ku dhaco COVID-19. Hase yeeshee, xog ayaa sheegeysa in dadka aanan caddaanka ahayn uu si xun u saameeyay COVID-19. Tani waxaa sababtay sameeynta cunsuurinimada, qaasatan, cansuuriyada qaabdhismeed bulshada, taasoo ka dhigeysa kuwa fursad yar uheysta in ay badbaadiyaan bulshadooda iyo kuwa kale. [Takoorka ma caawinayo la dagaalanka xanuunka](#). La wadaag xog sax ah dadka kale si aad meesha uga saarto xanta iyo xogta khaldan inay faafaan.

- [Faafida Korona Fayras cusub ee 2019 \(COVID-19\) ee WA State Department of Health](#)
- [Gurmadka Gobalka Washington ee Korona Fayras \(COVID-19\)](#)
- [Raadi Waaxda Caafimaadka ee Deegaankaaga ama Degmada](#)
- [CDC Korona fayras \(COVID-19\)](#)
- [Ilaha Yareynta Takoorka](#)

### **Ma qabtaa su'aalo dheeraad ah?** Wac khadka Macluumaadka COVID-19 **1-800-525-0127**

Isniin – 6 a.m. to 10 p.m., Talaado – Axada iyo [maalmaaha fasaxa ah ee gobalka](#), 6 a.m. to 6 p.m. Haddii aad u baahan tahay turjumaanka, **riix #** markay kuu jawaabaan kadibna **dheh Soomaali**. Wixii su'aalo ah oo la xariira neefsigaaga, baaritaanka cudurka COVID-19, ama natiijooyinka baaritaanka, fadlan la xariir dhakhtarkaaga.

Si aad dukumiintigaan oo qaab kale u codsato, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 ([Washington Relay](#)) ama iimeel udir [civil.rights@doh.wa.gov](mailto:civil.rights@doh.wa.gov).